Kanton Bern
Canton de Berne

# Waxbarashada qasabka ah ee Gobolka looga hadlo Jarmalka ee Gobolka Bern

## Macluumaadka loogu talagalay waalidiinta

Elterninformation zur Volksschule Somali

Bildungs- und Kulturdirektion

## Tusmooyinka

Hordhac ................................................................... 3

Waxbarashada qabsabka ah ......................................... 4

Ujeedooyinka waxbarashada qasabka ah....................... 5

Taageeada iyo Kor u qaadista ..................................... 10

Waalidiinta iyo waxbarashada qasabka ah.................... 12

Masuuliyaddaha/Qeexida Shuruudaha la Isticmaalay .. 15

## Impressum

Herausgeberin und Copyright:
Bildungs- und Kulturdirektion
Amt für Kindergarten, Volksschule und Beratung
akvb.bkd@be.ch

Auflage 2020
Download: www.erz.be.ch/elterninfo
2019.ERZ.1267

## Hordhac

Warqaddan waxay ku siineysa macluumaadka ku saabsan nidaamka dugsiga dowladda ee Gobolka ee Bern waxayna ku siineysa jawaabaha su'aalaha soo socda:

- Sida ay yihiin dugsiga barbaarinta iyo dugsiga hoose iyo dugsiga sare dhexe iyo heerarka loo qaabayay?
- Dugisga muxuu ka filaya waalidiinta?
- Maxay waalidiinta sameyn karaan si ay uga caawin carruurtooda inay ka dareemaan raaxda dugsiga oo ay helan waxbarashadooda ugu badan?

Macalimiinta iyo maamula dugsiga ee deegaanka(*Gemeinde*) ayaa ku faraxansanaan doonaan inay ku siiyan macluumaad dheeraad ah..

## Waxbarashada qabsabka ah

### Macluumaadka Guud

Allgemeines

Sharci ahaan, waxbarashada qasabka ah waxay ku dhammaata muddo kow iyo sano ah.

Mudada waxbarashada qasabka ah waxay ka bilaabtaa (gelida dugsiga barbaarinta) sanadka uu canuga ama uu jirsad 31da July. Haddii ay doortaan, waalidiinta ayaa dib u dhigi kara taariikhda bilbaaista oo hal sano ah.

Dugsiga wuxuu bixinaya qalabka waxbarista iyo qalabada dugsiga ee ardayda oo lacag la'aan ah,

Gabdhaha iyo wiilasha ayaa lagu faraya inay si wada jir ah iyo waxbaris isku mid ah inay u isticmaalaan labada jinsi.

Waxbarashada qasabka ah waa dhedhexaad leh xushmada diimaha kala duwan.

Guddiga dugsiga (*Schulkommission*) iyo maamulayaasha dugsiyada ee degmo walba ayaa ka masuul ah shaqada dugsiga barbaarinta iyo dugsiyada.

Haddii waalidiinta ay dooraatan inay carruurtooda dhigtaan dugsi gaar ah, waa inay iyaga iska bixiyaan lacagaha.

Carruurta qabaa naafanimada iyo baahiyada gaar ah ma dhigan karaan dugsiyada dowladda waxaa ay dhigayan dugsiyada waxbarashada gaar ah (*Sonderschule*).

### Ujeedooyinka waxbarashada qasabka ah

Ziele der Volksschule

Waxbarashada qasabka ah waxay bixisaa waxbarashada aasasiga ah ee aqoonta iyo hormarinta xirfada, taas oo aasaaska u dhigta waxbarashada xirfada mustaqbalka, waxbarashada dheeraad ah ee heerka dugsiga sare iyo waxbarashada nololsha-dheer. Intaa waxaa dheer, dugsiga inuu fududeynayo hormarintta aqoonta, wuxuu bixiya jawiga fahmka xushmad ee labada dhinac iyo dulqaadka wuxuna ardayda ku dhiiragelinaya inay ula dhaqmaan si masuuliyad ah bani'aadamka kale iyo deegaanka.

### Lehrplan 21

Lehrplan 21 waxay u adeegaan macalimiinta dugsiga barbaarinta sanadka 9 ee dugsiga sida jiheyaha ka caawinaya qorshaha casharkooda.

## Ujeedooyinka waxbarashada qasabka ah

<table>
<tr><td></td><td>Heerka dugsiga sare<br>Sekundarstufe II<br><br>Xirfada waxbarashada ama tababarka ama dugsiga sare (sida apprenticeship ama Baccalaureate school)</td><td colspan="2">2–4 sano</td></tr>
<tr><td rowspan="4">Waxbarashada qabsabka ah<br>Volksschule</td><td>Heerka dugsiga hoose (sano 7–9)<br>Sekundarstufe I<br><br>Sekundarschule heerka shuruudaha ama<br>Realschule heerka shuruudaha</td><td colspan="2">3 sano</td></tr>
<tr><td rowspan="2">Heerka dugsiga koowaad (sano 1–6)<br>Primarstufe</td><td rowspan="2">6 sano</td><td>Heerka dugsiga hoose<br>4 sano</td></tr>
<tr><td rowspan="2">Basisstufe/<br>Cycle élémentaire<br>3-5 sano</td></tr>
<tr><td>Dugsiga barbaarinta<br>Kindergarten</td><td>2 sano</td></tr>
</table>

**Dugsiga barbaarinta**
Kindergarten
Carruuta ku jirta dugsiga barbaarinta sanadaha koowaad iyo labaad waxaa si wada jir ah loogu baraya hal fasal. Dugsiga barbaarinta waxay siisa carruurta booska nolosha, ciyaarta iyo waayo araganimo wada jir ah. Ujeedkeedu waa dhiraagelinta iyo kor u qaadista hormarinta iyo waxbarshada, inta ay qaadaayso baahiyada gaar ah, kartiyada, xawaaraha waxbarashada ee la iska rabo.

Sharci ahaa, dhammaan carruurta waa inay ugu wareegan heerka dugsiga hoose 1 sano kadib markii labo sano ay qaatan dugsiga barbaarinta. Kiisaska ka reeban, waxay ku saleysan tahay hormarka canuga, isaga/iyada waxaay bilaabi karaan 1 sano heerka dugsiga hoose, hal sano ka kor ama hal sano ka dib.

www.erz.be.ch/kindergarten

Degmooyinka qaar, dugsiga barbaarinta ayaa si wada jir ah loogu bara labada sano ee ugu horeysa dugsiga hoose (kooxo badan) maalin dhan ama qeybta *Basisstufe* ama Koox *Cycle élémentaire* (arag jadwalka kor).

www.erz.be.ch/basisstufe
www.erz.be.ch/cycle-élémentaire-de

### Heerka dugsiga koowaad (sano 1–6)

**Primarstufe (1.-6. Schuljahr)**

Laga bilaabo 1 sano 6, ardayda ayaa qaadanaya waxbarashada kala duwan ee maadooyinka, sida luuqadaha (*Sprachen)*, xisaabta (*Mathematik*) iyo naqshada (*Gestalten*). Ardayda waxay qaadanayan heerka kordhinta madaxbanaanida iyo masuuliyadda waxbarashooda iyo shaqada.

Laga bilaabo sanadka 3, ardayda gobolka looga hadlo-Jarmalka ee canton waxay baranayaan Faransiis sida luuqadooda koowaad, sanadka 5 waxay bilaabayaan Ingiriiska sidoo kale.

Kadib heerka dugsiga, carruurta waxay u gudbayaan heerka dugsiga dhexe. Sanadka 5, dugsiga wuxuu siinaya carruurta iyo waalidiinta macluumaad faafaahsan oo ku saabsan qaab loogu gudbayo heerka dugsiga dhexe.

### Heerka dugsiga dhexe (sano 7–9)

**Sekundarstufe I (7.-9. Schuljahr)**

Heerka dugsiga dhexe, ardayda waxay qaadnayaan waxbarashada heerka shuruudaha *Realschule* ama heerka shuruudaha *Sekundarschule*. Shuruudaha heerka Sekundarschule ayaa aad la iska rabaa markii loo eego heerka Realschule.

Ardayda ayaa loo xilsaaraya heerka ku haabon macalinkooda, oo ku saleysan koorsada hormarintooda.

Mudada waxbarashada heerka dugsiga dhexe oo dhan, waxaa loo saraa waxbarashada guud, sidoo kale doorashada waxbarshada mustaqabalka iyo hadafyada xirfada. Dugsiga wuxuu ciyaara doorka taageerada ee nidaamka sameynta go'aanka, ardaydna waxaa laga caawinaya waxana la talin doonaa waalidiintooda, macalimiintooda iyo hagida la taliyaaha inta ay ka dooranayaan wadada xirfadooda.

www.biz.erz.be.ch

### Waxbarashada qasabka ah kadib

**Nach der Volksschule**

Kadib mudada waxbarshada qasabka ah, ardayda waxay dhammeynayaan barnaamijka waxbarashada xirfada laboilaa-sano iyo tababarka ama ay dhiganayan dugsiga sare.

Macluumaadka dheeraad ah ee horaanta: www.erz.be.ch/berufsbildung
Ka arag macluumaadka bogga hoose ee dugsiyada sare ee takhasususka iyo dugsiyada Baccalaureate:
www.erz.be.ch/mittelschulen

## Sanad dugsiyada iyo fasaxyada dugsiga

### Schuljahr und Schulferien

Dugsiga wuxuu bilaabanaya bartaha-Agosot wuxuuna dhammanaya horaanta July. Ardayda waxay dhiganayan waxba-rashada 38 ama 30 toddobaad sanad walba. Toddobaadka-39 sanad dugsiga, maalaha fasaxaya waxaa loo qeybiyey sida soo socota:

- Fasaxa deyrta Sebtembar/Oktobar: sadex toddobaad
- Fasaxa qabowaha Desem-bar/Jaanayo: labad toddobaad
- Fasaxa cayaaraha Febaraayo: hal toddobaad
- Fasaxa xagaaga Abriil: labo tod-dobaad
- Fasaxa kulelaha July/Agosot: shan toddobaad

Taariikhda saxda ah ee fasaxyada dug-siga iyo maalmahala fasaxa (fasaxyada bangiga), waxaa lagu soo bandhigay bogga dugsiga ama degmada.

## Jadwalka

### Stundenplan

Waxbarista waxay dhacaysa Isniinta ilaa Jimcaha. Mudada hal xiiso waa 45 daqiiqo. Ardayda waxay dhiganayan afar cashar subaxii. Barista subaxii ayaa bilaabaneysa waxayna dhammaaneysa isku mar dhammaan fasalada waxba-rashada qasabka ah ("dhismaha" waq-tiyada). Galbihii, mudada waxbarashada waxay ka kooban tahay labo ilaa afar cashar. Waxay ku xiran tahay sanadka (heerka) dugsiga iyo fasalka, waxay noqon kartaa hal ama dhowr galab toddobaadkii marka ay ardayda dugsi laheyn.

Waalidiinta ayaa masuul ka ah inay hubi-yan in ilmooda ay xaadiraan dugsiga si waafaqsan jadwalka. Inta lagu jiro saaca-dah waxbarashada, dugsiga ayaa ma-suul ka kormeerida carruurta.

Saacadaha ka baxsan waxbarashada iyo marka ay so aadan dugsiga ama ka imaanayasan, carruurta ayaa loo arkaa inay jiraan gacanta waalidiintooda. Ka reeban: dugsiga wuxuu siisa ilaha gaa-diidka sababtoo imaanshaha iyo laaba-shada dugsiga waxaa loo aqoonsahay in tahay sabab aan looga tagi karin ilmaha.

## Maqnaanshaha iyo ogolaanshayasha loo qorsheyeyseegitaanka

### Absenzen und Dispensationen

Canuga ma ahan inuu maqnaado waxbarashada haddii isaga ama iyada uusan cudur daaranin. Waalidiinta waxaa laga codsanaya inay ogeysiiyaan maclinka seegitaanka ilmahooda sida ugu dhaqsiyaha badan, sida ugu degdeg badan, ka hor inta aysan bilaabanin wax barista. Cudur darrada la aqbali karo ee maqnaanshaha waa: jirada ilmaha, geerida qoyska, guurista, booqosho dhakhtar ama daantiiste.

Waalidiinta ayaa laga yaabaa inay caruurtooda ka kaxeeyaan dugsiga ugu badnaan shan maalin iyo bar sanad dugsiyeedka iyadoon loo siin dugsiga sababta maqnaanshaha. Macalimiinta waa in loo ogeysiiya si degeg ah, si kastaba ahaate.

Maamulaha dugsiga ayaa ogolaan karaa maqnaanshaha la xiriira qorshaha u dabaal degida ciida, xafladaha muhiimka ah qoys, dhigashada luqada afka hooy ee canuga iyo dhaqankan (HSK), ama imtixaanka waxbarasho. Ogolshaha maqnaanshaha qorsheysan waa in laga helaa si degdeg ah.

## Layligaguriga (shaqo guri)

### Hausaufgaben

Waxbarashada dugsiga waxay dhaceysaa inta lagu jiro casharada Layliyada shaqo guriga waxay dhigan tahay diyaarin, muraajada casharada. Carruurta waa inay awooddan inay sameyeen layligooda guriga iyadoo uusan waalidka caawineyn ama qof kale oo weyn.

Waqtiga ugu badan layliga guriga toddobaadkii:

- 30 daqiiqo sanadaha 1 iyo 2
- 45 daqiiqo sanadka 3 ilaa iyo 6
- 90 daqiiqo sanadka 7 ilaa iyo 9

Macalimiinta waxay u saxayan qiimeynta layliyada guriga si waafsan awooda waxbarashada gaar ah ee ardayga iyo surtagalnimada.

**Qiimeynta**

**Beurteilung**

Ujeedada ugu muhiimsan ee qiimeynta waa in lagu dhiirrigeliyo barashada iyo koritaanka; ujeedadu waa inuu ilmuhu dareemo in qiimeyntu ay taageertaada waxbarashadiisa/eeda.

Sanad dugsiyeed walba, fasalka macalinka wuxuu ku casuuma waalidiinta kulan gaar ah (*Standortgespräch*). Kulankan, macalinka iyo waalidka waxay ka hadlan wax ku saabsan natiijada dugsiga ee hormarka waxbarshada isaga ama iyada iyo kobaca. Kulmada dheeraad ah ayaa lagu qaban karaa codsiga waalidiinta ama dugsiga.

Ardayda waxay helayan qoraalka qiimeynta warbixinta dhammaadka sanadka 2 iyo dhammaadka sananadaha 4 ilaa 9. Warbixinnada waxaa ku jira qiimeynta natiijada cunuga ee maadooyinka kala duwan. Laga bilaabo sanadka 4 natiijada ardayda waxaa lagu qiimeynaya buundooyinka warbixinta.

Arag bogga hoose wixii macluumaadka faafaahsan ee qimeynta dhowr luuqadood: www.erz.be.ch/beurteilung

## Taageeada iyo Kor u qaadista

### Taageerada gaar ah
Besondere Förderung

Carruurta u baahan caawinta waxbarashada gaar ah ee ku aagaga gaar ah (sida luuqada ama xisaabta) ayaa loogu talagalay inay helaan taageero macalin si gaar ah u tababaran.

Haddii u canuga u muuqdo inuu qabo dhibaatooyinka waxbarashada, qiimeynta ayaa lagu sameyn doonaa (oo leh ogolaanshaha waalidka) u qabanayo khabiir waxbarashada oo ka socoda dugsiga ama the gobolka (*Kantonale Erziehungsberatung*/gobolka adeegyada la talinta waxbarashada). Dakhtarka aqoonta u leh dhimirka canuga oo ka socda adeega la talinta ayaa qiimeynaya haddii loo baahan taageerada gaar ah haddii kale. Waxaa sidoo kale la siiya qoysaska la talin iyo carruurta qabta dhibaatooyinka xaaladdaha adag.

Wixii macluumaad ah kala xiriir adeeg la talinta waxbarashada:
www.erz.be.ch/erziehungsberatung

Haddii canuga ku dhacayo hadafyada gaarista waxbarshada inkaasto la siyey taageerada, isaga ama iyada ayaa heli karaa waxbarashada iyo qiimeynta ku saleysan hadafyada waxbarashada shaqsi gaar ah.

Carruurta ku jirta sanadka 1 kuwaas oo ubaahan qaar ka waqtiga dheeraadha ee lagu sameynayo arinta si loogu ogolaado ayaa qaadan kartaa ilaa labo sano in la helo qalabkan.

Gaar ahaan ardayda leh hibadda gaar ah ayaa ka qeybqadan kara barnaamijka kor loogu qaadayo koriimadooda (*Begabten-förderung*). Si kastaba ha ahaatee, qiimeyn ay adeega la-talinta waxbarashadu waa shuruuda ka qayb qaadashada barnaamijkan.

### Fasalada gaar ah
Besondere Klassen

Degmooyin badan, carruur naafada ah, kuwaas oo ku jira heerka dugsiga dhexe ama heerka dugsiga hoose, waxaa ay tagi karaan fasalka waxbarashada gaar ah (*Besondere Klasse*). Tirada ardayda ku jirta fasalada waxbarashada ayaa laga kuwa kooban si macalinka u awoodo inuu carruurta taxadar badan ay ku bartaan.

### Shaqaalaha Bulshada Dugsiga
Schulsozialarbeit

Shaqaalaha bulshada dugsiga waxay caawiyaan oo ay talo siiyaan dhalinyarada ee la kulmada dhibaatooyinka bulshada ama gaar ah. Macalimiinta, maamulaha dugsiga iyo waalidiinta ayaa sidoo kale la tashan kara xafiiska shaqaalaha bulshada.

## Maalindugsiyeedka

Tagesschule

Degmooyinka waxay siiyaan carruurta maalin dugsiyeeda kuwaas oo baahan kormeerid ka baxsan saacadaha waxbarashada.

- Kormeerida ka hor bilaabista maalin dugsiyeedka
- Kormeerida inta lagu jiro mudada maalin bareedka, oo leh bixinta qadada
- Kormeerida waxbarashada waxay dhammaaneysaa galabta ama galbada marka uusan jirin dugsi.

Maalinta dugsiyeedka waa ikhtiyaar. Waalidiinta jacel inay u diraan canugooda maalinta dugsiga waxaa laga qaadaya lacag ku saleysan dakhligooda, hantidooda iyo tirada qoyska.

Wixii ah macluumaadka guud ee ku saabsan maalinta dugsiyeedyada arag:
www.erz.be.ch/tagesschulen

Waalidiinta waxay heli karaan macluumaad ku saabsan maalin dugsiyeedka macallinka fasalka, maamulaha dugsiga, ama degmada.

Waalidiinta waxay ka heli karaan macluumaadka ku saabbsan dugsiga barbaarinta ee surtagalka ah (xanaanada-maalinta goobaha carrruurta, shaqaalaha xanaaneyaasha iwm.) degmada.
www.gef.be.ch > Familie (qoys)

## Caafimaadka

Gesundheit

Dhammaan ardayda waa in la baara sanadka 4 iyo sanadka 8. Baaritaan waa qasab waana lacag la'aan.

Dhammaan ardayada waa in sidoo kale ay maraan baaritaanada ilkaha ee sanadlaha ee sameyo dhakhtarka ilkaha ee dugsiga. Baaritaankan waa qasab waana lacag la'aan.

Waaldiinta ayaa u sheegi doonaa dakhtarka ama kan ilkaha dareenka ah inay jirto baahida dheeraadka ah ee saxida ama daaweynta.

## Waalidiinta iyo waxbarashada qasabka ah

### Wada shaqeyn

**Zusammenarbeit**

Waalidiinta iyo dugsiyada waxaa looga baahan yahay ka wada shaqeynta sharciga. Macluumaadka si waadirista joogto ah iyo fahamka labada dhinaca, kalsoonida iyo xushmad waa muhiimada wada shaqeyntan.

### Wadaagista macluumaadka

**Gegenseitige Information**

Dugisga wuxuu marwalba ogeysiin doonaa waalidinta wax ku saabsan dhacdooyinka muhiimka ah iyo qorshayaa la xiriira waxbarashada (xafladaha, safarada dugsiga. iwm) ama maamulka dugsiga (layliga dugsiga ama fasalka, waqtiyada waxbarashada, agayada waxbarshada, xeerarka dugsiga iwm.). Macluumaadkan waxaa lagu bixiya qoraal ahaan ama kulmada waalidiinta (*Elternabenden*).

Kulmada macalinka-waalidka gaar ah (*Stand-ortgespräche*) waa aaasasida ugu muhiimsan ee loogu wada shaqeynta ka dhaxeya dugsiga iyo waalidiinta.

Waalidiinta waxaa laga rabaa inay xaadiraan casharka waqtiga walba maadada ka hor ballanta macalinka.

Waalidiinta waxaa laga codsanaya inay ogeysiiyaan macalinka fasalka haddii canuga u xanuunsan yahay, haddii canugu u baahan yahay inuu si joogto ah u qaato waado ama haddii ay wax dhacdo ama waxyaaha saameynaya koritaanka canuga ama awood la'aanta dareenka.

### Turjumis

**Übersetzung**

Waa muhiim inay waalidiinta fahamaan waxaa looga hadlay kulmada-dhacada-waalidka ama shirka macalinka-waalidka. Waxaa sidoo kale muhiim ah in waalidiinta ay awoodaan muujinta walaacyada iyo weydiinta su'aalaha. Haddii waalidiinta' xirfadaha Luuqada Jarmalka iyo Faransiiska ay ku filneyn, turjumaan ayaa la codsanaya.

### Go'aamada muhiimka ah

**Wichtige Entscheide**

Dhammaan walacyada go'aamada muhiimka ah ee wadada waxbarashada canuga (ka gudbida dugsiga u gudbiada heerka dugsiga dhexe, tusaale ahaan, ama layliga fasalka gaar ah) ayaa looga hadlay canuga iyo waalidiinta.

Waalidiinta waxay xaq u leeyihiin in la ogeysiisiyo, maqlaaan ama la taliyo macalimiinta canuga iyo maamulaha dugsiga. Waalidiinta waxaa laga rabaa inay la socdan dhamman galyada walacyada canugooda. Maamuaha dugsiga wuxuu sameynayaa go'aanka ku saabsan wadada waxbarashada ardaydga iyo in waalidiinta qoraal ahaan loogala xiriiro, iyo sharaaxaad go'aanka. Marmarka qaarkooda waalidiinta waxay

khilaafan go'aanka, waxay leeyihiin ikhtiyaarka ay u gudbinayan racfaanka Kormeerka Dugsiga (*Schulinspektorat*) 30 maalmood gudahood oo ogeysiis ah.

## Ku lug lahaanshaha waalidiinamada
Mitwirkung der Eltern

Dugsiyo badan ayaa leh waalid ka kooban hal ama labo wakiilo waalidka fasal walba. Wakiilada ayaa ah waalidiin waxana la doorta bilowga sanad dugsiyeedkawaxaa doorta waalidiinta carruurta fasal walva, Wakiilada waalidka ee fasalka shaqada ayaa si dhaw ula shaqeynaya macalinka fasalka. Gollaha waalidka wuxuu joogteynaya xiriir u dhaxeya waalidiinta iyo dugsiga

Waalidiinta ayaa ogaan wax badan oo ku saabsan ku lug lahaanshaha waalidnimada ee dugsiga barbaarinta ama dugsiga ee macalinka fasalka ama maamulaha fasalka.

## Dhibaatooyinka waxbarashada qasabka ah
Probleme in der Volksschule

Waxaa laga yaabaa in ilmuhu dareemo caajiso fasalka ama laga yaabo in heerka uu leeyahay ama dadalkeeda/kiisa si lama filaan ah loola dhacay. Canugu waxaa laga yaabaa inuu dhibaato kala kulmo carruurta kale, ama isaga ama iyada waalidiinta ku khilaafi karaan go'aanka macalinka.

**Tallaabooyinka ay waalidiinta qaadayan:**

1. Waalidiinta iyo macalinka ayaa xiriir la sameyn midba midkiisa kale. Waxay si wada jir ah ayay u hadli karan waxayna raadinay qaabka lagu xalinayo. Xaaladaha intooda badan, waddadani waxay keenaysaa xal qanci taan ah.
2. Haddii waalidiinta iyo macalinka ay isku raaci waayaan xalka, iyo hal ama labada dhinac kala duwan ayaa lagama marmaan ah, kulan u dhaxeya ayaa loo qabanaya waalidiinta, iyo maamulaha dugsiga, iyo macalinka.
3. Waqti walba, waa surtagal sido kale inay helaan adeegyo gaar ah oo qeyb ka ah, sida xafiiska shaqada bulshada ee dugsiga ama adeeg la talinta waxbarashada gobolka.
4. Haddii aan la gaari karin heshiis, waalidiinta ayaa racfaan ka qaadan kara Kormeerka Dugsiga.

Dugsiga ayaa diyaarin kara turjumaan haddii la marmaan tahay.

**Ka soo guurista gobolka ee Bern**

Zuzug in den Kanton Bern

Carruurta u dhaxeysa da'da 4 iyo 15/16 waxaa sharci ahaan waajib ah inay xaadiraan dugsiga inta ay degan yihiin Switzerland iyo dhowrka bilood ay rabaan inay joogaan.

Waalidiinta dhawaan u soo guuray gobolkaBern, ayaa ka heli macluumaadka ku saabsan waxbarashada degmadooda (Gemeinde) ama boggooda dugsiga ee goobtooda ay degan yihiin.

Ardayda leh dhibaatooyinka barashada luuqada ayaa heli kara macluumaad dheer ah ee taageerada luuqada.

Ardayda 15 jirka ah ama ka weyn oo aan laheyn aqoonta luuqada, ayaa dhigan Koorsooyinka Degdeg ah Gobolka (Regionaler Intensivkurs PLUS, RIK+).

Wixii macluumaad dheeraadawaxaa laga heli karaa www.erz.be.ch/migration

## Masuuliyaddaha/Qeexida Shuruudaha la Isticmaalay

### ee Waaxda Waxbarashada
**Erziehungsdirektion**

Waaxda waxbarashada waa maamulka waxbarashada ee gobolkaal. Waxay qeexeysaa qaab dhiseedka waxbarashada qasabka ah ee degmooyinka, arrimaheeda manhajka.

### Kormeerka dugsiga
**Schulinspektorat**

Kormeerka dugsiga waa maamulka gobolkaal ee kormeerka waxbarshada qasabka ah.

### Degmada
**Gemeinde**

Degmada waa ka masuulka qabanqaabada waxbarashada qasabka ah ee bulshada. Waxay bixisaa dhismaha waxbarashada: dhismooyinka dugsiga, kurasta iyo qalabyada waxbarashada.

### Guddiga Dugsiga
**Schulkommission**

Guddiga dugsiga ayaa ku hubinaya inay carruurta xaadiraan xanaanada carruurta iyo dugsiga si waafsan sharciga gobolka iyo shurudaaha degmada. Wuxuu sido kale masuul ka yahay go'aamada istarajiyada ku saabsan ee dugsiga.

### Maamulaha dugsiga
**Schulleitung**

Maamulaha dugsiga ayaa masuul ka ah shaqada dugsiga. Shaqooyinka kale, isaga ama iyada ayaa ku qoraya carruurta fasalda shaqsuga wuxuuna masuul ka ah go'aamo garista ardayda' la socodka waxbarashada.

### Macalinka fasalka
**Klassenlehrperson**

Macalinka fasalka waa masuul ka ah waxbarashada iyo hogaaminta ururka ee fasalka. Isaga ama iyaa waa qof koowaad ee la xiriiro dhammmaan su'aalaha iyo arrimaha la xirriir xaadisita xanaanada dugsiga iyo dugsiga canugaaga.

